

# Fahanka Warbixinta Ardaygaaga

## Gobalka Maine ayadoo la Adeegsanaayo Buundada Cabirka Imtaxaanka Sanadka

Jaantusyada midabka leh, ee jiifa ee ku qoran bogaga 1 iyo 2 ee warbixinta ardaygaaga ayaa muujinaaya buundada heerka ardaygaaga. Buundadaan ayaa cabiraysa dedaalka ardaygaaga ee ku aadan imtaxaankaan ayadoo laga eegaayo xirfadaha muhiimka ah ee akhriska iyo xisaabta ee heerka fasalkiisa marka loo eego Heerarka Buundada Guud ee Gobalka.

Imtaxaanka akhriska ee fasalka 6-aad wuxuu cabiraa xirfadaha sida:

- U adeegsiga tusaaleyaasha iyo xikaayooyinka si loo sharxo macnaha sheekoooyinka, ciyaaraha, gabay-yada, iyo qoraallada xogta.
- Aqoonsiga sida qaab dhismeedka sheekada, ciyarta, ama gabaygu isku waafaqsan yahay si loo abuuro mawduuc, goob, ama qayb.
- Go'aaminta fikradaha wariyaha ama hadal jeediyaha.
- Sharaxaada sida qoraagu ku abuuray fikirka wariyaha ama hadal jeediyaha qoraalka.

Imtaxaanka xisaabta ee fasalka 6-aad wuxuu cabiraa xirfadaha sida:

- Fahanka sida miisaannada iyo qiimeyaashu ula xiriiraan xisaabta ku dhufada iyo u qaybida.
- Adeegsiga cabirada iyo qiimeyaasha si looga jawaabo su'aalah.
- Fahanka jajabka u qaybida si buuxda.
- Gaarsiinta aqoonta lambarada tirooyinka dhiban iyo kuwa buuxa.
- Qorista, fahanka, iyo adeegsiga muujinta iyo qaacidada xisaabta.

## Buundooyinka Aaga Casharka

Buundooyinka Aaga Casharka oo ku qoran bogga 2 ee Warbixinta Gaarka ah ee Ardayda ee ardaygaaga ayaa kuu sahlaaya inaad aragto dhinacyada uu awooda u leeyahay iyo meelaha uu ardaygaagu u baahan yahay inuu hormar ka sameeyo maadadaas. Ma aha wdarta guud ee buundada maadada oo dhan.

Tusaale, haddii ardaygaagu uu buundada ugu sarayso ka haysto Qoraalka Aqoonta Luuqada, aagaas ayaa noqonaaya meel uu heer sare ka gaaray. Haddii buundada Qoraalka Warbixinta uu hooseeyo, taas ayaa noqonaysa aag uu ku liito.

Fadlan la xiriir macalinka ardaygaaga si aad xog dheeri ah uga hesho sida aad u taageeri karto waxbarashada ardaygaaga ee Aagagaan Casharka.